

Marka Shil la Galo

Haddii aad gasho shil adiga oo caymis la'aan ama hoos imaad kale oo mas'uuliyad lacageed (FR) ah, waxa dhici karta inay jiraan ganaaxyo kale. Waxa dhici karta dhici in lagugu ganaaxo hakin badbaado oo laba sano ah ama xukumaad hakin muddo aan xad lahayn, illaa waxyeellooyinka la qancinayo bixintooda.

Marka la raaco Qaybta 4509.06 ee Xeerka Dib Loogu Noqday, wadayaasha shil baabuur (iwm.) galay ee ku damabeeyey inay ku dhaawacmaan ama ku dhintaan dad kale, ama hanti ka badan \$400 ku burburto, ayaa ku fayl gareyn Warbixin Galitaan Shil Baabuur (BMV 3303) xafiiska Ohio BMV gudaheeda lix bilood kadib shilka haddii la soo garto in wadaha kale uu haa bilaa-caymis.

Haddii warbixin la fayl gareeyo, wadaha eedeysanaha ah ayaa fursad u yeelan in uu u dhiibo hoos imaadka mas'uuliyadda lacageed (FR) ka hor inta BMV ayna bilaabin habsocodka hakinta liisanka.

Warbixintani wey ka duwan tahay warbixinta ay ka qaadaan saraakiisha fulinta sharcigu isla goobta shilku ka dhacay. Foomamka warbixinta shilka waxa laga heli karaa rugaha "Ohio State Highway Patrol" (Waardiga Waddo-Weynta Gobolka Ohio), hay'addaada caymis ama wakiilka shirkadda, hay'adaha kale ee sharci fulinta, Machadka Caymiska Ohio ama adiga oo galaya barta internetka ee BMV oo ah: www.bmv.ohio.gov.

Waa in aad ka haysata cadeyn garaash sharciyeeysan hagaajinta goarigaaga caymiska gaarigaaga uu ku jiro in uu cadeeyaa lahaanshadaada ceymiska. Waliba dhiib wixii macluumaad ee aad heli karto ee ku saabsan qofka kale sida magaca, lambarka Sooshal Sekuritiga, cinwaanka, lambarka liisanka wadidda, lambarka taarigada, samaynta iyo moodelka baabuurka.

Iyaga oo fiirinaya warbixinta shilka baabuurka (iwm.), ayey BMV ogaan haddii qolada kale leedahay caymis. Haddii qolada kale ayna lahayn caymis, waraaq hakin ah ayaa loo diri iyaga. Haddii qolada kale sabab u haayeen burburka, waxa laga yaabaa in liisankooda la hakiyo illaa inta ay bixinayaan (ama tabaabushe ay sameystaan inay bixiyaan) burburkaaga.

Saxiixa Foomka Ganaaxa

Mar kasta oo aad codsato liisan ama fasaxa waditaanka, ama aad diiwaan galiso baabuur, waxa lagaaga baahan yahay inaad saxiixdo foomka mas'uuliyad lacageed. Saxiixan ku yaal foomka ayaa garawsanaya in adigu aadan baabuur wadayn caymis la'aan ama la'aanteeda huwanaan mas'uuliyadda lacageed (FR). Codsiga diiwaan-galinta boosta lagu soo diro ayaa waliba wata qoraal la mid ah oo adiga lagaa rabo inaad saxiixdo oo aad soo celiso. Saxiixa foomkan ayaan kaa dhaafeyn adiga waxa lagaaga baahan yahay ee ah inaad tusto hoos imaadka lacagta mas'uliyeed



WWW.BMV.OHIO.GOV
Ohio Bureau of Motor Vehicles
Financial Responsibility Section
P.O. Box 16583
Columbus, OH 43216-6583
614-752-7700



**OHIO DEPARTMENT
OF PUBLIC SAFETY**
SAFETY • SERVICE • PROTECTION

WWW.PUBLICSAFETY.OHIO.GOV
Ohio Department of Public Safety
P.O. Box 182081
Columbus, Ohio 43218-2081

BMV 3127 12/13 [760-1012]

Ma Wadi Kartid Baabuur (IWM.) Ohio Adigoon Lahayn Caymis



Waxyaabaha looga Baahan yahay Huwanaanta FR

Xil-Saarnida Caymiska ayaa bixinaya burburka aad adigu sababtay oo qolo kale wax u geysatey ee noqon kara dhaawaca qofka, dhimashada ama burburka milkiyadda. La tasho wakiilkaaga caymis si aad u ogaato inaad leedahay huwanaanta habboon. Waxaad u baahan tahay ugu yaraan \$25,000 oo ah dhaawaca gaara jirka qofkii kasta, \$50,000 dhaawaca gaara laba qof ama wax ka badan iyo \$25,000 oo burburka milkiyadeed.

Marka loo Baahdo, Huwanaanta FR ayaa lagu tusi karaa:

- Heshiiska (policy) Caymiska
- Kaar aqoonsi caymis (oo leh huwaan heshiiska caymis mid la mid ah)
- Damaanad xil-fuliye (surety bond) oo ay soo saarto shirkad xil-fulin kasta oo idman.
- Bond lagu damaand qaaday hanti-ma-guurto ah oo qiimaheedu ugu yaraan tahay \$60,000
- Caddayn lacag lagaga goostay BMV ama bond dawladeed oo ah \$30,000 oo la dhigayo Lacag-Hayaha Gobolka Ohio
- Caddayn BMV oo is-caymis ah, oo ay heli karaan kaliya shirkadaha ama dadka leh ugu yaraan 26 baabuurta iyo wiixii motor ku shaqeeya.

Ohio gudaheeda, waa sharci ka-baxsanaan in la wado wax kasta oo sida baabuurta oo kale ah iyada oo aan la hoos iman caymis ama mas'uuliyad lacageed kale (FR). Waxa kale oo sharciga ka-baxsan in qofka iska leh baabuurka uu u oggolaado qof kasta oo kale in u wado baabuurkaas (iwm.) ee qofku iska leeyahay iyada oon mas'uuliyada lacageed (FR) la hoos iman.

Adiga waxa lagaa rabaa sharci ahaan inaad tusto huwaan Lacag Mas'uuliyadeed (FR):

- Mar kasta oo sarkaal bileys u tigidh taraafik u bixiyo
- Joojin kasta oo dhammaan baarista baabuurta (iwm.) ku lug leh
- Marka maxkamadda taraafigga la yimaad
- Marka baarista lama-filaanka ay sameynayaan Diiwaan-Galiyaha Ohio BMV



Ganaaxyada:

Wadaha ama qofka iska leh (baabuurta iwm.) ee ka gaabiya in u tuso caddayn huwaan mas'uuliyad lacageed (FR) ayaa:

- Ayaa waayaya liiskankiisa/keeda darawalnimo illaa shuruudaha lala kulmayo dambiga ugu horreeya, hal sano dambiga labaad iyo laba sano dambiyada ku biira
- Ayaa waayaya taargooyinkiisa/eeda liisan iyo diiwaan galitaanka baabuurka (iwm.)
- Ayaa bixinaya urooyin (fees) ah \$100 dambiga ugu horreeya, \$300 dambiga labaad, iyo \$600 dambi kasat oo ku biira
- Bixinaya ganaax ah \$50 oo ah ka-gaabin kasta oo iska dhiibka liisankiisa/keeda waditaan, taargooyinka liisan ma diiwan-galinta
- Looga baahan yahay inay gacanta ku hayaan huwaan mas'uuliyad lacageed (FR) gaarka ah (caymiska "Halista-sare" leh ama u-dhigma) oo ka fayl gareysan BMV muddo saddex illaa shan sano

Kolka hakintu dhaqan gasho, ayaa wade kasta ama qofka leh baabuurka (iyo wixii la mid ah) ee ku xad-gudba hakinta ayaa baabuurkiisa (iwm.) laga joojinayaa oo liisankiisa/keeda taarigo ayaa lagala wareegayaa ugu yaraan 30 # dambiga ugu horeeya iyo 60 maalmood dambiga labaad. Dambiyada saddexaad ama kuwa ka sii dambeeya, baabuurka (iwm.) ayaa laga qaadayaa oo la iibinayaa, markaana qofka iska leh baabuurka looma oggolaanayo inuu baabuur (iwm.) ka diiwaan-gashado Ohio illaa shan sano. Ganaaxyadan ayaa marka lagu daro ganaaxyada lacageed ama ganaaxyo ay soo rogtay maxkamad sharci.